# Degaan Ka Bax

Condemnations

## Ogeysiis degaan ka bax ah malagu dhajiyey gurigaaga?

Xogta urursan ee deganayaasha qol ama guri la kireysto ee lagu dhajiyey ogeysiiska degaan ka bax waayo dhibaato la xiriirta dayactirka, korontada iyo biyaha oo ka go'an ama xaalad kale oo caafimaadka khatar ku ah. Magaalooyinka qarkood, sabab kale oo guriga looga dhigo degaan ka bax waa haddii aanu mulkiiluhu heysan leesinka kirada guryaha. Mararka qaarkood ogeysiiska waxaa ku qoran "waxaa la doonayaa in laga dhigo degaan ka bax" ama "Ha Dagin."

Ogeysiiska waxaa ku qoran taariikhda la doonayo in laga guuro guriga. Ilaa la joojiyo degaan ka baxa ma ahane, waa in aad ka guurtaa guriga taariikhda laguu qabtay ama booliska ayaa kaa saaraya. Waxa aad wici kartaa magaalada oo aad weydiisan karto waqti dheeraad ah, laakiin kuma khasbana in ay ku siiyaan waqti dheeraad ah.

## Sidee Loo Joojiyaa Degaan Ka Baxa Ama Loo Helaa Caawinaad Aad Ku Guurto

La soo xiriir xafiiska degaankaaga ee gargaarka sharciyada si ay kuu caawiyaan ee (877) 696-6529. Magaalooyinka qaarkood waxa aad ka qaadan kartaa racfaan go'aanka degaan ka baxa. Waxa kale oo codsan kartaa Talaabada Degdegga ah ee Magdhawga Kireystaha (ETRA) si uu kireeyuhu u sameeyo dayactirka una joojiyo degaan ka baxa, ama u bixiyo lacagta guuritaanka ama hoteelka.

Akhri xogta urursan ee *Dhibaatooyinka Dayactirka ee Degdegga Ah*.

## Haddi ay waajib noqoto in aad guurto



Haddii aad kala qoroteen heshiiska kirada, wuu burayaa maadaama gurgii laga dhigay degaan ka bax. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in aanu kireeyuhu kugu laheyn wax lacag ah ka dib marka ay magaaladu ku amarto in aad guurto.

Waxaa laga yaabaa in ay jiraan hay'ado kaa caawin kara guuritaanka, ku siin kara hoy, ama kuu raadin karaa degaan cusub. La soo xiriir 2-1-1 gobolka oo dhan. Waa hay'ad aad ka heli karto goobaha dadka caawiya. Waxa kale oo aad soo diri kartaa fariin aad soo raaciso nawaaxiga aad degan tahay 989-211 si aad u ogaato xaafadahaaga ama la soo xiriir si aad internetka kula sheekeysato www.211unitedway.org/about-211/somali/.

Haddii aadan heysan lacag aad ku guurto ama aad ku bixiso hoyga cusub, waxaa suurogal ah in aad helo karo Gargaarka Degdeggga ah (EA). Ka codso khadka (online) ee https://mnbenefits.mn.gov/. Ama la xiriir Waaxda Gargaarka Dadweynaha ee degmada aad degan tahay (Economic Assistance Department.)

## Waa in kireeyuhu kuu soo celiyaa keydka kirada 5 cisho gudahood laga bilaabo taariikhda aad guurtay maadaama aan guriga la deganaan karin.

U dir kireeyaha waraaq aad ugu sheegeyso halka lacagta laguugu soo diri karo. Codsigaaga qoraal ahaan ku soo gudbi oo nuqul (koobi) ka reebo. Akhri xogta ururusan ee *Lacagta Keydka Ee Kirada.*

## Dacwad ka dib marka aad guurto.

Waad dacweyn kartaa kireeyaha ka dib marka aad guurto. Akhri xogta ururusan ee *Maxkamadaha Dacwadaha Madaniga.* Waxaa wanaagsan in aad sameyso waxyaabaha ay ka midka yihiin:

- Heysato diiwaan aad maxkamadda hor keeni karto sida lacag qabashada kirada, heshiiska kirada, iyo warqadaha kireystaha.
- Soo qaado amarka baaraha guryaha iyo ogeysiiska degaan ka baxa ee magaalada.
- Haddii aad awoodo, sawir ka qaad dhibaatada dayactirka ka hor inta aadan guurin. Qor ciladaha dayactirka iyo goorta ay bilaabatay.
- U yeer markhaati kula eega guriga.
- Heyso dhamaan lacag qabashada kharashka aad gasho marka aad guurto: hotel, kharashka guuritaanka, shidaalka, cuntada iyo bakhaarka alaabada la dhigo.



Haddii gurigaaga horey looga dhigay degaan ka bax markii aad u soo guurtay, waxa aad dacweyn kartaa kireeyaha oo lagaaga qaadi karaa 3 laab khrashka kirada iyo keydka kirada ee aad bixisay. La xiriir guryo baaraha magaalada si aad u ogaato markii ugu horeysay ee ay magaaladu ka dhigtay griga hoy ka bax.

Dacwadaada u diiwaangeli sida ugu dhaqasha badan. Tag maxkamadda oo weydiiso in aad cabasho ka furto maxkamadda dacwadaha madaniga ah.  Waxa aad weydiisan kartaa ilaa $20,000 Maxkamadda Madaniga ah umana baahnid qareen.

Wixii ka badan $20,000 waxa aad ka dacweyn kartaa Maxkamadda Degmada laakiin waxa aad weydisan kartaa qareen.

Haddii ay dhibaatada xagga dayactirku keentay dhaawac jirka ah ama xanuun, ama sunta ka dhalata rinjiga, la tasho qareen qaabilsan dhaawaca ka hor inta aadan diiwaan gelin dacwada kirada.

Waxa aad u baahan tahay magaca iyo cinwaanka kireeyaha. Waxa aad ka heli kartaa baaraha magaalada ama xafiiska canshuuraha. Lacag yar ayaa lagaa qaadayaa, laakiin waa lagaa cafinayaa haddii dakhligaagu yar yahay.

## Waa maxay waxyaabaha aan weydiisan karo maxkamadda?

Waxa aad weydiisan kartaa:

- **Lacagta keydka ee kirada (Security Deposit)** Haddii aanu kireeyuhu kuu soo dirin keydka kirada, ama waraaq faahfaahineysa 5 cisho gudahood, waxa aad weydiisan kartaa laba laab lacagta keydka. Waxaa kale oo aad weydiisan kartaa $500 oo dheeraad ah oo ah in uu "si xun kuula dhaqmay"

- **Lacagta kirada:** Waxa aad soo ceshan kartaa kirada oo dhan ama qeyb ka mid ah bil kasta oo kireeyuhu ogsoonaa dhibaatada xagga dayactirka ah laakiin uusan waxba ka qaban. Marka ay xaaladda gurigu ay aad u liidato oo laga dhigo degaan ka bax, waxa aad codsan kartaa in kirada laga dhigo eber. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in laguu soo celiyo dhamaan kirada aad bixisay bil kasta oo guriga laga dhigay degaan ka bax.

- **Kharashka guuritaanka:** Weydiiso lacagta dheeraadka ah ee kaaga baxay degaan ka baxa guriga. Waa in aad heysataa dhamaan lacag qabashada kharashka aad gashay. Xitaa haddii aadan heysan lacag qabasho, weli waad weydiisan kartaa qaaliga lacagtaas.

## Tusaale dacwadda

Halkan waxaan kuugu soo gudbineynaa tusaaladda dacwadda Maxkamadda Madaniga ah.

Waxa aan ka kireystay guri 71 Smith St., #3, Minneapolis, MN 55405 kiraayaha John $700 bishii. Waxa aan u soo guuray 1dii Janaayo 2013. Waxaa laga dhigay degaan ka bax 15kii Juun biyo kulul la'aan iyo dayactir kale. Biyaha kulul waxa ay ka go'een 2dii Maarso. Dhibaatooyinka kale horey ayey u soo jireen markii aan soo guuray.

Kireeyuhu marna iima soo celin keydka kirtada iimana soo dirin waraaq 5 cisho gudahood. Cabashadeydu waa sida soo socota:

| | |
|---|---|
| Lacagta Keydka Ee Kirada (Security Deposit) | $700,00 |
| Ganaaxa keydka Ee Kirada (Security Deposit): | 700,00 |
| Dhaawaca sida xun oo ilaa dhaqmay: | 500,00 |
| Dhibaatooyinka dayactirka: Janaayo-Febraayo | 400,00 |
| Dhibaatooyinka dayactirka: iyo biyo kulul la'aan, March-Juun | 2000,00 |
| Kharashka guuritaanka: | 683,84 |
| **WADAR** | $4983,84 |

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**